



Liisanada dirawalka ee loo xayiray ganaaxyo aan la bixin dib ayaa looga heli karaa amarka cusub ee maxkamada

-
- ❖ Akhri macluumaadkaan *kaliya* haddii aad ku nooshahay gobolka Washington.
-

Waaxda Liisamadu (DOL) uma xayiri karto liisamada dirawalada markaanu dirawalku bixin tigidhada danbiyada wado-marista ama aanu aadin maxkamada isagoo ka jawaabaya tigidhka wado-marista. Maxkamad ayaa ku dhawaaqday in tani aanay dastuuri ahayn.

Maxkamadu waxay amartay DOL inay soo celiso liisamada la xayiray, taasoo macneheedu tahay inaan la xayirin doonin. Maxkamadu waxay sidoo kale ka xayirtay DOL inay si toosa u xanibto liisamada dirawalada aan bixin ganaaxa tigidhada ilaa sharci cusub la dhaqan galinaayo Janaayo 2023.

-
- ❖ Amarka maxkamadu wuxuu la xidhiidhaa hakinta **sharci jabinta dhaqdhaqaaqyada aan danbiga ahayn** sida xawaaraha. Ma daboolayo xayiraadaha danbiyada wado-marista sida gaadhi ku wadista liisan xayiran ama lala noqday (DWLS3), kaxaynta gaadhi adoo daroogaysan ama cabsan (DUI), ama wadista bilaa taxadirka ah.
-

Maxay tani iiga dhigan tahay aniga?

Haddii liisankaaga loo xayiray kaliya inad ku guul daraysatay bixinta tigidhada wado-marista ama aanad kasoo muuqan maxkamad:

- Liisankaaga dirawalnimada lama xayiraayo, mudada **Juun 16, 2021**.
- Maaha inaad bixisid \$75 ee lacagta dibu soo saarista.

- DOL waxay dib usoo celin doontaa liisankaaga haddii aad ku haboon tahay in laguusoo celiyo.

Maxaan sameeyaa marka xigta?

Ka diwaangali liisankaaga DOL wabsaaydka eXpress si aad u go'aamisid xaalada liisankaaga dirawalnimada. Waa bilaash. dol.wa.gov/licenseexpress.html. U raac talaabo-talaabo tilmaamaha.

Waa inaad iska bixisaa lacagta kharashka guud ee liisanka iyo cusbooneysiinta. Si aad waxbadan uga ogaatid lacagahaasi, booqo dol.wa.gov/driverslicense/fees.html.

Dirawalada qaar ayaa u baahan doona inay maraan imtaxaano dariwalnimo. Si aad waxbadan uga ogaatid shuruudaha imtaxaanka, kharashka, iyo goobaha, booqo dol.wa.gov/driverslicense/testing.html.

Miyaan bilaabi karaa dirawalnimada imika?

Waa laga yaabaa. Hubi si aad u xaqiijisid in xayiraada laga qaaday adoo:

- Wacaaya DOL khadkeeda tooska ah: (360) 902-3900; **AMA**
- Ka eeg xaalada liisankaaga
dol.wa.gov/driverslicense/checkstatus.html

Waxa macquula inaad bilowdid wadista marlabaad haddii dhamaan kuwan dhab yihiin:

- Liisankaaga waxa loo xayiray 6 sano ee u danbeeyey adoo bixin waayey lacagta ama kasoo muuqan waayey maxkamad
- Liisankaaga wadistu wuxuu dhacay wakhtigaa gudihiisa
- Liisankaaga waad haystaa

❖ **Gaadhi ku kaxaynta liisan la xayiray waa sharci daro.** Iska ilaali in lagu ganaaxo oo jeel lagu geeyo. Gaadhiga ku kaxee kaliya liisan saxa.



Miyaa wali maxkamada ama wakalaada ururintu igu leedahay ganaax?

Haa. Kuwaasi ma hadhaan.

Waxaad codsan kartaa qorshe lacag-bixin ama, badelkeeda lacag bixinta, codso inaad qabatid adeega bulshada ee dayntaasi. Ka akhri [Liisankayga Dirwalnimada Waa La Xayiray. Dib Ma u Heli Karaa?](#)

❖ **TAXADIR:** Mushaharkaaga iyo/ama akoon bangi ayaa laga goosan karaa haddii aanad bixin ganaaxyada ama adeegyada bulshada aanad qaban.

Liisankaygu ma xayirnaba, manuu dhicin. Miyaan u baahanahay inaan wax sameeyo?

Liisankaagu waa sax waanad ku wadan kartaa gaadhiga. Wali waa lagugu leeyahay ganaaxa wado marista. Marlabaad waxaad codsan kartaa qorshe lacag bixin ama adeega bulshada, haddii aanad awoodin inaad bixisid ganaaxoo dhan.

Ka akhri [Liisankayga Dirwalnimada Waa La Xayiray. Dib Ma u Heli Karaa?](#) wixii macluumaad dheeriya. Ka raadi WashingtonLawHelp.org.

Liisankaygu ma xayirnaba, lakiin wuu dhacay imika. Maxaan sameeyaa?

Haddii liisankaagu dhacay, waa inaad dib u cusbooneysiisataa. Taasi waxa ku jiri kara marista imtaxaano qoraala iyo wadisa. Booqo dol.wa.gov/driverslicense/testing.html si aad waxbadan uga ogaatid shuruudaha imtaxaanka, kharashka, iyo goobaha.

Qaado foom kale oo aqoonsi ilaa aad dib u helaysid liisankaaga.

Waan hubiyey xaalada liisankayga. Liisankaygu wali wuu xayiran yahay. Maxaan sameeyaa?

Liisankaagu wali wuxuu xayirnaan karaa dhowr sababood oo kale. Tusaale ahaan, haddii lagaaga baahan yahay inaad yeelatid masuuliyad maaliyadeed, wac caymiska SR-22, dirawalada khatarta badan ku jira, ama haddii aanad bixin caawimada cunuga.



DOL waxay sidoo kale xayiri kartaa liisankaaga haddii aad yeelatid tigidho ganaaxyo badan mudo kooban (lix ama hal sano gudohood ama todomo ama labo sanadood gudohood)

Macluumaad badan oo khuseeya caymiska SR-22 ee dirawalada khatarta badan ku jira, booqo dol.wa.gov/driverslicense/sr22.html

Si aad waxbadan uga fahamtid xayiraadaha liisanka ee bixin la'aanta caawimada cunuga, akhri [Caawimada Cunuga iyo Xayiraada Liisanka](#). Waxaad sidoo kale booqan kartaa dol.wa.gov/driverslicense/suspendchildsupport.html

Qaado foom kale oo aqoonsi ilaa aad dib u helaysid liisankaaga.

Waligay maan yeelan liisan dirawalnimo lakiin tigidho ganaax awged, imika kuma habooni inaan helo liisan. Ma heli karaa liisan hada?

Haddii aan waligaa lagu siin liisan dirawalnimo Washington dhexdeeda ama gobol kale oo aad heshay tigidh ganaax wado maris, DOL waxay xayirtay xuquuqahaaga dirawalnimada. Ka hubi xaaladaada dol.wa.gov/driverslicense/checkstatus.html, waayo waxa macquula inaad imika ku haboon tahay inaad heshid liisankaaga.

Haddii aad imika ku haboontahay, waxaad qaadan kartaa imtaxaanka qoralaka iyo dirawalnimada si aad u heshid liisankaaga. Si aad waxbadan uga ogaatid shuruudaha imtaxaanka, kharashka, iyo goobaha, booqo dol.wa.gov/driverslicense/testing.html.

Qaado foomkale oo aqoonsiya ilaa aad helaysid liisankaaga.

Maxaan sameeyaa haddii DOL tidhaah iska bixi lacagta \$75 ee dibusoo saarista?

Haddii lagaa qaado lacagta **dirawalnimada inta liisankaagu ku xayiran yahay heerka saddexaad** (DWLS3), oo lacagtana la yareeyey, la diiday ama danbi lagugu helay ah DWLS3, waxaad ku haboonaan kartaa ka dhaafka lacagta \$75 ee dibusoo saarista. Iimayl uga dir DOL FTAQuestions@dol.wa.gov ka hor intaanad aadin DOL ama dib uga cusbooneysiisan onlaayn ogeysii shaqaalaha DOL xaaladahaaga. DOL ayaa dib u eegi doonta diwaankaaga dirawalnimada si loo go'aamiyo inaad ku haboon tahay ka dhaafka.



-
- ❖ Wixii su'aalo ah, iimay uga dir DOL FTAQuestions@dol.wa.gov oo haddii aad u baahan tahay caawimo, fiir hoos.
-

Hel Caawinaad Sharci

- **Kaga codso onlaayn** halkan [CLEAR*Online](https://nwjustice.org/apply-online) - nwjustice.org/apply-online
- **Miyaad ka waajahaysaa wax arimo sharci ah Degmada King** (oo aan ahayn Guri-kasaaris ama hanti u qaadasho dayn)? Wac 2-1-1 (ama bilaash wicitaana 1-877-211-9274) maalmaha shaqada 8:00 am - 6:00 pm. Waxay kuu gudbin doonaan bixiyaha kaalmada sharciga.
- **Miyaad ka waajahaysaa wax arimo sharci meel ka baxsan Degmada King** (oo aan ahayn Guri-kasaaris ama hanti u qaadasho dayn)? Wac CLEAR Hotline ee 1-888-201-1014 maalmaha shaqada inta u dhaxaysa 9:15 am - 12:15 pm ama ka codso onlaayn nwjustice.org/apply-online.
- **Soo Wajahida Ka Saarida Guriga?** Wac 1-855-657-8387.
- **Maku haysataa dhibaatooyin la xiriira deyn ka qaadashada dadka aad deynta ku leedahay?** Wac 1-800-606-4819.
- **Waayeelka (da'da 60 iyo ka weyn)** ee leh arimo sharci oo ka baxsan Degmada King wac CLEAR*Sr ee 1-888-387-7111.
- **Naaada maqalka, maqalku ku adag yahay ama naafada hadalku** waxay wici karaa lambarada lagu isticmaalo adeega ay doortaan.

CLEAR iyo 2-1-1 oo siin doona turjumaano.

Daabacaadaan waxay bixinaysaa macluumaad guud oo laxariira xaquuqahaaga iyo waajibadka kusaaran. Looguma talagelin in uu bedelo talooyinka sharciyeed ee gaarka ah.

© 2021 Northwest Justice Project — 1-888-201-1014.

(Fasax ayaa loosiiyay inay koobi kala baxaan ayna qaybiyaan Alliance for Equal Justice (Ururka isbahaysiga Sinaanta Cadaalada) iyo shaqsiyaad sababo kabaxsan ganacsi oo kaliya.)